| Qaybaha oo Dhan | # Hagaha Kaqaybqaataha<br><br>## Korriinka Ilmaha ee Aasaasiga ah |
| --- | --- |
| **La Cusboonaysiiyay 6/2025** | **8 Saacadood** |

**Xuquuqda lahaanshaha iyo Xadidnaanta Isticmaalka iyo Mas'uuliyadaha Ka Dhalanaya**

Manhajkaan waxaa lagu diyaariyay maalgalin ay bixisay Waaxda Caruurta, Dhalinyarada iyo Qoyska ee Minnesota.  Waaxda Caruurta, Dhalinyarada iyo Qoyska ee Minnesota wax wakiil ah kama ahan wax mas'uuliyad ahna kama saarna isticmaalkiisa ama natiijadiisa.  Manhajkaan waxaa laga yaabaa inaan dib loo soo saarin, lama koobin karo, lama iibin karo ama si kale looma qaybin karo ayada oo aan ogolaansho qoraal ah laga haysan Waaxda Caruurta, Dhalinyarada, iyo Qoyska ee Minnesota.

Si aad u codsato ogolaansho qoraal ah oo ku saabsan isticmaalka ama dib usoo saarista qayb kamid ah manhajkaan, iimayl u dir DCYF.Child.Care@state.mn.us.

## Guudmarka Qaybta 1aad

**Knowledge and Competency Framework (KCF, Qaab-dhismeedka Aqoonta iyo Kartida) ee Minnesota ee Aagga Mowduuca Xirfadlayaasha Dhallaanka, Aagga Maadada Child Development Associate (CDA, Isku Xirka Horumarinta Carruurta)**

- Qaybta Nuxurka KCF: I. Korriinka iyo Waxbarashada Caruurta
- Aagga Maadada CDA: VIII. Mabaadii'da korriinka iyo waxbarashada carruurta

**Qeexitaanka Koorsada:**
Barashada da'da iyo marxaladaha korriinka caruurta iyo qodobada saamaynta ku leh korriinka caruurta inta lagu jro tababarkaan aasaasiga ah. Dib u eegista guulaha korriinka ee ku hagaya caruurta wadada horumarka shanta sanno ee ugu horeysa noloshooda. Baarista howlaha korriinka ku haboon iyo qiimaha cayaartu u leedahay nolosha caruurta yaryar, iyo sidoo kale muhiimadda xiriirku u leeyahay taageerista korriinka caruurta ee mustaqbalka, waxbarashada, iyo guusha.

**Ujeedooyinka Waxbarashada:**
Inta tababarkaanu socdo, ka qaybqaateyaashu waxay:
- Baranayaan mabaadii'da muhiimka u ah horumarka iyo barashada carruurta.
- Aqoonsanayaan qaybaha barashada horumarka carruurta iyo higsiyada muhiimka ah.

### Guudmarka Qaybta 1aad

| | Wakhtiga Qaybta | Fikradaha Muhiimka Ah | Xeeladaha Waxbaridda |
|---|---|---|---|
| **A** | 15 qodobada kulanka | Soo Dhawaynta/Hordhacyada<br>Dib-u-eegista ujeedooyinka | Qiimeynta Hantida Baahida Kooxda<br>Milicsiga shakhsi ahaaneed |
| **B** | 25 daqiiqo | Waa maxay Korriinka Carruurta? | Hal Abuurka Kooxda Balaaran<br>Dooda Kooxda Yar |
| **C** | 20 daqiiqo | Guudmarka Qaybaha Barashada Horumarka Carruurta | Muuqaal<br>Hawsha Koox Yar<br>Dooda Kooxda Balaaran |
| **D** | 35 daqiiqo | Barashada Higsiyada Horumarka | Fikir ka dhiibashada webseedka<br>Muuqaal<br>Hal Abuurka Kooxda Balaaran<br>Howl koox balaaran |
| **E** | 15 daqiiqo | Wax kaqabashada Xiliga hore ah: Wax ka qabashada walaacyada: | Dooda Kooxda Balaaran |
| **F** | 10 daqiiqo | Dib-u-eegista Ujeedooyinka | Soo xiritaanka |
| | Wadarta Guud ee Wakhtiga: 2 saacadood | | |

## Ilaha Kulanka

- Help Me Grow MN: Waa Maxay Higsiyada Horumarka?
- Early Childhood Indicators of Progress (ECIPS, Tilmaamayaasha Horumarka Carruurnimada Hore): Tilmaamayaasha Horumarka Dhallaanka: Minnesota's Early Learning Standards
- CICC: The Center for Inclusive Child Care
- Waaxda Caafimaadka Minnesota Barnaamijka Follow Long

**Waa maxay Korriinka Carruurta?**
Horumarka carruurta wuxuu tixraacayaa habka ay carruurtu u koraan oo isu beddelaan laga bilaabo xilliga dhalashada ilaa qaangaarnimada. Sannadaha hore ee laga bilaabo dhalashada ilaa da'da sideed sanno waa kuwo si gaar ah muhiim ugu ah maadaama ay aasaaska u dhigayaan xirfadaha caruurtu u baahantahay waxbarashadooda iyo korriinkooda mustaqbalka.

## Mabaadii'da Muhiimka u ah Horumarka iyo Barashada carruurta

**National Association for the Education of Young Children (NAEYC, Ururka Qaranka ee Waxbarashada Carruurta Yaryar)**

1. Waxbarashada iyo Korriinka ilmuhu waa nidaam isbadbadala kaasoo uu saameeyo hab nololeedka caruurtu, sida hiddahooda iyo firkooda jireed, iyo bii'ada la tacaamulaysa, oo ay kujiraan qoyska, dhaqanka, iyo waxyaabaha ay wajahaan. Qodobadaan waxay qaabeeyaan midba midka kale iyo sidoo kale qaabka mustaqbalka korriinka caruurtu noqonayo.

2. Dhammaanba qaybha korriinka caruurta (jir ahaan, garaad ahaan, bulsho ahaan iyo shucuur ahaan, luuqadda hadalka) waa muhiim. Qaybahaanu waa kuwo iskuxiran oo midba kan kale saamaynayo.

3. Cayaartu waxay sare u qaadaa waxbarashada farxadda ku dhisan taasoo xoojinaysa luuqadda isxakamaynta, xirfadaha iyo awoodaha garaadka bulshada, iyo sidoo kale aqoonta tacliimeed. Cayaartu waxay lagama maarmaan u tahay dhammaanba caruurta, laga bilaabo dhalashada ilaa sideeda sanno.

4. Inkastoo korriinka caruurtu raaco hanaan guud oo guulo ah, haddana canug walba wuxuu sameeyaa horumar iyo koritaan awoodiisa ku salaysan. Isbadalada ka dhasha xaaladaha dhaqanka, waaya-aragnimada, iyo kaladuwanaanshaha shakhsiyaadka ayaa sidoo kale loo baahanyahay in la xeeriyo.

5. Carruurtu waa bartayaal firfircoon tan iyo markii ay dhashaan. Si joogto ah ayay u ururiyaan una habeeyaan macluumaadka si ay u sameeyaan macne iyagoo ka dhex baranaya xiriiradooda, la falgalkooda deegaanka, iyo waaya-aragnimadooda guud.

6. Dhiiranaancaruurta ee inay waxbartaan waxay korortaa marka bii'adooda waxbarashadu taageerayso dareenkooda lexjeclada, ujeedada, iyo madaxbanaanida. Qaababka manhajka iyo waxbarashada wuxuu dhisaa korriinka caruurta asagoo ku xiraya waaya-aragnimadooda goobta xanaanada caruurta ilaa gurigooda iyo goobaha bulshada.

7. Caruurtu waxay wax u bartaan qaab iskuxiraya dhowr qaab oo waxbarasho iyo waxyaabo kala duwan ah. Sabab la xiriirta in aasaaska waxyaabaha la baranayo lagu soo dhisay xiliga hore ee dhallaanka, bareyaashu waxay u baahanyihiin inay fahmaan qaabka caruurtu wax u bartaan qayb walba oo waxbarasho ah iyo sida caruur walba si wanaagsan wax loogu baro.

8. Korriinka iyo waxbarashadu waxay hormaraan marka caruurta loo carbiyo korriinka  iyo waxbarashada oo ah heer wax yar ka sareeya xirfadahooda markaas jira iyo marka ay haystaan fursado badan oo ka tajumaya iyo ku dhaqanka xirfadaha ay dhawaan barteen.

9. Markii loo isticmaalo si mas'uuliyad iyo ujeedo leh, teknoolojiyadda iyo warbaahinta la isku dhexgalo waxay noqon karaan aalado qiimo badan u leh taageerada korriinka iyo waxbarashada caruurta.

## Ciyaarta Isbarbar-dhigga Qaybaha barashada KorriinkaCarruurta

Korriinka Jirka, S&E = Korriinka Bulshada iyo Shucuurta,
LLC, Luuqadda, Akhriska, iyo Hadalka, C = Korriinka Garaadka

| Qaybta | Hawlaha Ilmaha |
|---|---|
| | Ilmo socod-barad ha yaa alaab yaryar iskugu keenay alaab waaweyn dhexdeeda. |
| | Afar sanno jir ayaa muujinaya in uu fahmay, naxariis, iyo damqasho ku aadan dadka kale. |
| | Laba sanno jir ayaa xasuusanaya sida ay isugu xigto hees caan ah |
| | Saddex sanno jir ayaa sugaya tookadiisa boombalaha kaasoo ay doonayso inay ku cayaarto. |
| | Ilmo socod-barad ah ayaa albaabka tilmaamay markii la weydiiyay inuu doonayo inuu banaanka u baxo. |
| | Ilmuhu wuxuu ka jawaabayaa hadalka codka daryeelbixiyaha iyo ficiladiisa. |
| | Ilmo yar oo dhabarka isu rogaya asagoo caloosha u jiifay. |
| | Afar sanno jir akhrinaya tirooyinka sida saxda ah ee ay isugu xigaan ilaa 10. |
| | Socod-barad ayaa muujinaya wacyiga ama digtoonaanta ku aadan dadka waaweyn ee uusan aqoon. |
| | Laba sanno jir ayaa bilaabaya inuu dadka weydiiyo su'aalaha "sabab". |
| | Laba sanno jir ayaa soo rogaya baalasha buugga. |
| | Sadex sanno jir ayaa garanaya qaababka bii'ada. |
| | Afar sanno jir ayaa jaakadiis xiranaaya. |

**Websaydka: Help Me Grow MN: Waa Maxay Higsiyada Horumarka?**
https://helpmegrowmn.org/HMG/DevelopMilestone/index.html

**Shaqada Kormeerka**

Kormeer laba carruur ah oo isla da’ ah oo qor dabeecadahooda iyo hawlahooda.

Hawlo noocee ah ayay carruurtu ku mashquulsan yihiin?

Waa maxay waxyaabaha ay ka siman yihiin iyo waxa ay ku kala duwan yihiin ee dhanka xirfadahooda iyo kartidooda.

Maxay samayn karaan carruurtan?

Maxaysan samayn karin?

Miyay jecel yihiin wax isku mid ah?

Miyay u dhaqmaan si isku mid ah?

Maxay tani kaaga oranaysa horumarka ilmaha?

# Guudmarka Qaybta 2aad

**Knowledge and Competency Framework (KCF, Qaab-dhismeedka Aqoonta iyo Kartida) ee Minnesota ee Aagga Mowduuca Xirfadlayaasha Dhallaanka, Aagga Maadada Child Development Associate (CDA, Isku Xirka Horumarinta Carruurta)**

- Qaybta Nuxurka KCF: I. Korriinka iyo Waxbarashada Caruurta
- Aagga Maadada CDA: VIII. Mabaadii'da korriinka iyo waxbarashada carruurta

**Qeexitaanka Koorsada:**
Barashada da'da iyo marxaladaha korriinka caruurta iyo qodobada saamaynta ku leh korriinka caruurta inta lagu jro tababarkaan aasaasiga ah. Dib u eegista guulaha korriinka ee ku hagaya caruurta wadada horumarka shanta sanno ee ugu horeysa noloshooda. Baarista howlaha korriinka ku haboon iyo qiimaha cayaartu u leedahay nolosha caruurta yaryar, iyo sidoo kale muhiimadda xiriirku u leeyahay taageerista korriinka caruurta ee mustaqbalka, waxbarashada, iyo guusha.

**Ujeedooyinka Waxbarashada:**
Inta tababarkaanu socdo, ka qaybqaateyaashu waxay:
- Baadh aasaaska kobaca hore maskaxda iyo xeeladaha lagu taageerayo koritaanka caafimaad ee maskaxda carruurta yaryar.
- Aqoonso dhaqamada taageera horumarka shucuureed iyo bulsheed ee carruurta.

## Guudmarka Qaybta 2aad

| | Wakhtiga Qaybta | Fikradaha Muhiimka Ah | Xeeladaha Waxbaridda |
|---|---|---|---|
| **A** | 20 daqiiqo | Soo dhaweynta/Isbarashada, guudmarka Ujeedooyinka, Qaabka Wadanoolaanshaha Bronfenbrenner | Dooda Kooxda Balaaran |
| **B** | 30 daqiiqo | Kobaca Hore ee Maskaxda | Hal Abuurka Kooxda Balaaran<br>Hawsha Koox Yar |
| **C** | 30 daqiiqo | Kaalinta Xiriirka | Lammaanin iyo Wax wadaagis<br>Hawsha Koox Yar<br>Dooda Kooxda Balaaran |
| **D** | 30 daqiiqo | Meelaha Muhiimka ah ee Horumarinta Bulsheed iyo Shucuureed | Cayaarta Hawl Fulinta:<br>Lammaanin iyo Wax wadaagis<br>Milicsiga shakhsi ahaaneed |
| **E** | 10 daqiiqo | Dib-u-eegista Ujeedooyinka/Soo Xirista | Fikradaha Ugu Dambeeya |
| | Wadarta Guud ee Wakhtiga: 2 saacadood | | |

## Ilaha Kulanka

- Zero to Three
- Dhisidda Maskaxda aydoo la Adeegsanayo Cayaaraha: Howlaha loogu tala galay Dhallaanka, Ilmaha Socod Baradka, iyo Caruurta
- National Center for Pyramid Model Innovations (NCPMI)
- CSEFEL: Istiraatiijiyadha Saxda ah ee Macalimiinta/Daryeelbixiyeyaasha
- Xogta Xarunta Xannaanada Carruurta Loo Dhan Yahay


## Howlaha Dhissa Maskaxda

Qor liiska jimicsiyada dhisa maskaxda ee loogu talagalay koox walba oo isku da' ah.

| | |
|---|---|
| **0-6 bilood** | **6-12 bilood** |
| **12-24 bilood** | **2 sano** |
| **3 sano** | **4 sano** |

## Xiriirku

Xidhiidhada iyo waayo-aragnimada hore ee wanaagsan waxay caawiyaan "kicinta" isku-xidhka neerfaha waxayna saameeyaan cabbirka, nidaamka, iyo shaqada maskaxda. Maskaxda caruurtu waxay u koraysaa si gaar ah ayadoo lagu saleynaayo nooca xiririrka ku hareeraysan. Sawirka bidix waxa uu muujinaya maskax caafimaad qabta oo si wanaagsan u kobacday. Sawirka midig wuxuu muujinayaa saamaynta tacaddiga iyo dayacaadka. Meelaha madow waxay muujinayaan halka maskaxdu aanay firfircoonayn ama aanay ka kobcin. Ka bixiyayaasha daryeelka carruurta ahaan, waa in aan taageernaa horumarka shucuurta iyo bulshada carruurta oo aan siinnaa daryeel naxariis leh kana taageernaa xiriir caafimaad qaba.



**Ka Jawaabista Baahiyaha Shucuurta Carruurta**

| Shucuurta ilmaha | Habdhaqanka ilmaha | Waxa ilmuhu u baahanyahay | Waxa macalinku samayn karo |
| --- | --- | --- | --- |
| **Murugada** | | | |
| **Xanaaqa, ka tanbatay** | | | |
| **Niyad-xumo** | | | |
| **Cabsi iyo welwel** | | | |
| **Farxad, rayn-rayn, la dhacsanaan** | | | |

## Xeeladaha Xakamaynta Shucuurta

**Qaabka Xakamaynta Shucuurta**

- Caruurtu waxay wax ku bartaan marka ay daawadaan dadka waaweyn, oo ay kujiraan qaabka ay uga jawaabayaan xiliyada ay dhibaatadu jirto. Qaabee jawaabo ku haboon, sida qaababka adeegsiga neefsiga dheer, adigoo adeegsanaya cod dagan, adigoo isticmaalaya goob lagu xasilo, si ixtiraam lehna uga jawaabaya dadka kale.
- Qeex waxa aad samaynayso si aad isudajiso: "Waan niyad-xumahay, sidaas darteed waxaan rabaa inaan qaato neefsi oo dheer si aan u dego."
- Marka ilmaha xaaladu ka tanbadato, waxaad isticmaashaa xirfadaha isxakamaynta si ada ilmaha uga caawiso inuu isdajiyo. Ka agdhawow ilmaha, isticmaal cod naxariis leh, ugana garaab dareenkiisa.

**Bar Ereyada Shucuurta**

- Akhri buug, isticmaal qoraalada shucuurta, ama la wadaag sheekooyinka dadka si aad caruurta uga caawiso inay fahmaan ugana jawaabaan xaaladaha bulshada.
- Isticmaal xaalado maqaar-saar ama jilniin ah si wadajir ah si aad u muujiso jawaabaha ku haboon.

**Isticmaal Jadwalada iyo Howlmaalmeedyada Muuqda**

- Fahamka muuqaalka ah wuxuu caruurta ka caawiyaa inay bartaan waxa soo socda, taasoo ka caawinaysa yaraynta welwelka. Isticmaal sawiraanta howl-maalmeedyadaada deegaanka si aad caruurta uga caawiso fahmaka xaaladaha kala guurka ah.
- Ku casuun caruurta inay gacan ka gaystaan shuruucda fasalka si aad ay u yeeshaan lexkeclo iyo mulkiyada bii'ada.

**Sii Caruurta Xulashooyinka**

- Xulashooyinku waxay siinayaan dareen isxakamayn ah si loo yareeyo ku harjadista awoodda. Sii laba xulasho si aad ugu dhiirigaliso ka qaybqaadashada (sida, "Ma waxaad marka koowada qaadanaysaa xirmooyinka mise buugaagta?" "Ma waxaad jeclaan lahayd tufaax shiidan ama mooska inaad ku qadayso?")

**Samee Goob Xasilin**

- U diyaari goob aamusan, dabacsan oo barkimo jilicsan leh, walxaha wax dareema, baambaleyaasha, iyo buugaagta.
- Tusmee adigoo adeegsanaya goobta xasiloonida si caruurtu u fahmaan qaabka loo isticmaalo marka ay xaaladuhu ka tanbataan una baahdaan goob iyo wakhti ay naftoodu u baahantahay.

**Samee Xirfadaha Neefsiga iyo Dhaqdhaqaaqa**

- Bar neefsiga caloosha, afuufista buufinada, ama matalaadda daminta shumaca.
- Iskalabixinta ama socodka xayawaanka si ay u sii daayaan tamarta jirka sarena ugu qaadaan diirad saarista.

**Taageerista Baahiyaha Caruurta iyo Horumarinta Xirfadda**

- Wax ka qabo qodobo kasta oo caafimaad ama noolenimo ah kuwaas oo saamaynaya habdhaqanka caruurta (xaaladaha caafimaadka ama korriinka, hurdo la'aanta, gaajada, oonka, iwm.)
- Abuur dareen nabadgalyo iyo ammaan ah oo kajira deegaanka kana caawi inay la qabsadaan xaaladaha xun iyo uurkutaalada.
- Abuur jawi loo dhanyahay lana adeegsan karo kaasoo taageeraya awoodaha kala duwan ee caruurta, waaya-aragnimada, iyo baahiyaha dareenka.

- Ogsoonow baahiyaha korriinka caruurta waxaadna siisaa fursado ay ugu camal falaan una samaystaan xirfado cusub.

## Guudmarka Qaybta 3aad

**Knowledge and Competency Framework (KCF, Qaab-dhismeedka Aqoonta iyo Kartida) ee Minnesota ee Aagga Mowduuca Xirfadlayaasha Dhallaanka, Aagga Maadada Child Development Associate (CDA, Isku Xirka Horumarinta Carruurta)**

- Qaybta Nuxurka KCF: I. Korriinka iyo Waxbarashada Caruurta
- Aagga Maadada CDA: VIII. Mabaadii'da korriinka iyo waxbarashada carruurta

**Qeexitaanka Koorsada:**
Barashada da'da iyo marxaladaha korriinka caruurta iyo qodobada saamaynta ku leh korriinka caruurta inta lagu jro tababarkaan aasaasiga ah. Dib u eegista guulaha korriinka ee ku hagaya caruurta wadada horumarka shanta sanno ee ugu horeysa noloshooda. Baarista howlaha korriinka ku haboon iyo qiimaha cayaartu u leedahay nolosha caruurta yaryar, iyo sidoo kale muhiimadda xiriirku u leeyahay taageerista korriinka caruurta ee mustaqbalka, waxbarashada, iyo guusha.

**Ujeedooyinka Waxbarashada:**
Inta tababarkaanu socdo, ka qaybqaateyaashu waxay:

- Sharax sida dhaqanku u saameeyo horumarka carruurta.
- Qeex heerarka horumarka luqadda iyo garaadka ee dhallaanka.

## Guudmarka Qaybta 3aad

| | Wakhtiga Qaybta | Fikradaha Muhiimka Ah | Xeeladaha Waxbaridda |
|---|---|---|---|
| **A** | 10 daqiiqo | Soo dhawayn iyo Dib-u-eegista Ujeedooyinka | Dooda Kooxda Balaaran |
| **B** | 25 daqiiqo | Fahanka Korriinka Ilmaha Ayadoo la adeegsanayo Aragtida Dhaqanka | Dooda Kooxda Balaaran<br>Shaqada Gaarka ah |
| **C** | 30 daqiiqo | Lix Marxaladood oo Horumarka luuqadda ah | Dooda Kooxda Balaaran<br>Lammaanin iyo Wax wadaagis<br>Dooda Kooxda Balaaran |
| **D** | 40 daqiiqo | Marxaladaha Horumarka Garaadka ee Piaget | Dooda Kooxda Balaaran<br>Hawsha Koox Yar |
| **E** | 15 daqiiqo | Dib-u-eegista Ujeedooyinka/Soo Xirista | Shaqada Gaarka ah |
| | Wadarta Guud ee Wakhtiga: 2 saacadood | | |

## Ilaha Kulanka

- Cox Campus, Atlanta Speech School

**Ereyada lasoo gaabiyay**

- National Association for the Education of Young Children (NAEYC, Ururka Qaranka ee Waxbarashada Carruurta Yaryar) National Association for the Education of Young Children (NAEYC, Ururka Qaranka ee Waxbarashada Carruurta Yaryar)
- DAP: Developmentally Appropriate Behavior Guidance (DAP, Hagaha Korriinka

## Abuurista Deegaanno Tixgeliya Dhaqanada Kala duwan

Ku dheji calaamad xiddig agagaarka dhaqamada aad si wanaagsan u samayso. Ku calaamadee X meelaha u baahan horumarinta, ka dibna ku sharax sanduuqa hoose talaabooyinka aad qaadi doonto si aad u gaarto yoolalkaaga qaybahaas.

| | |
|---|---|
| | Baro carruurta iyo qoys kasta, si qasdi ahna ugu habee oo uga jawaab awoodahooda iyo baahiyahooda. |
| | Tusi carruurta inaan aragno oo aan qiimeyno dhammaan waxyaabaha iyaga ku saabsan, oo ay ku jiraan dhammaan shucuurtooda, iyo sifooyinka la xiriira jinsiyadooda iyo dhaqankooda (Price iyo Steed, 2016). Tani waa tallaabo muhiim ah oo ka caawisa carruurta inay dareemaan soo dhoweyn oo ay xiriir la yeeshaan macallimiinta iyo saaxibadooda. |
| | Abuuri deegaan ay carruurta iyo qoysasku jeclaan doonaan inay joogaan (tusaale, ka tarjumaya guryaha iyo dhaqamada carruurta, ay ku dareemayaan raaxo, soo dhoweyn, iyo ammaan). |
| | Dhis kalsooni adigoo bixinya bii'o jir ahaan iyo shucuur ahaanba ammaan ah. Kalsoonidu waa muhiim, waayo waxay dhistaa hab carruurtu ugu dhiirran karaan sahaminta iyo barashada xor ah. |
| | Bar carruurta sida ay isku daryeeli karaan iyagoo iscaawinaya, caruur kale u casuumaya ciyaarta, u dabaaldegaya guulaha, isla markaana bogaadinaya carruurta kale. |
| | Sii carruurta fursad ay hoggaamiyeyaal ugu noqdaan fasalka isla markaana u noqdaan isla markaan u caawiyaan saaxibadooda. |
| | Ku matal qoysaska adigoo fasalka ku soo bandhigaya sawirrada qoysaska, mashaariicda, iyo agabka kale ee ay sameeyeen qoysaska iyo carruurta. |
| | Adeegso Hab Ku habboon Horumarinta carruurta adigoo tixgelinaya aqoontaada ku saabsan carruurta iyo qoysaska markaad qorsheynayso hawlaha. |
| | U muuji carruurta iyo qoysaska mahadnaq iyo qadarin, kuna taageer oo u dabaaldeg marka ay gaaraan yoolalkooda. |
| | Dib u milicso hab fikirkaaga iyo dabeecaddaada marka aad ka jawaabeyso dhaqanka iyo baahiyaha horumarineed ee carruurta. |
| | Abuur faham ku saabsan tixraacyadaada dhaqan, oo sii wad kordhinta aqoontaada xirfadeed iyo midda dhaqan. |
| **Fiiro Gaar Ah:** | |

## Bii'ada Aqoontu Ku badantahay

Samee liis ah hababka aad uga taageerto carruurta horumarinta luqadda iyo xiriirka. Ku dar hawlo, isdhexgal, agabyo, iyo waayo-aragnimo waxbarasho.

- 
- 
- 
- 
- 

## Xaaladaha Kobaca Garaadka

Akhri xaalad walba waxaadna garataa marxaladaha korriinka ama habdhaqanka ku qeexan xaalad walba. Ka hadal qaabkii aad u taageeri lahayd korriinka garaadka ilmaha kana jawaab su'aalaha soo socda:

- Ilmo 10 bilood jir ah ayaa ooyaa markuu waalidkiis kaga tago goobta xannaanada carruurta si uu shaqadiisa u aado.
- Ilmo 18 bilood jir ah ayaa marar badan daadidaa isla baaldiga ay ku jiraan baloogyada.
- Ilmo seddex sano jir ah ayaa u malaynaya in dayaxu u raacayo goobta xannaanada carruurta.
- Ilmo afar sano jir ah ayaa ooya marka buskudka saaxiibadiis uu u kala go'o labo qayb, sababtoo ah waxay haysataa buskud ka badan.
- Ilmo 2 sano jir ah ayaa ku dhibtoonaya inuu dhameystiro xujada wuxuuna qaybaha ku kala tuuraa dhulka.
- Ilmo afar sano jir ah ayaa aad u xanaaqa markayaanay ugu horeyn safka loo galo dhaqashada gacmaha.
- Ilmo shan sano jir ah ayaa isku daydo in ul tahay sixir waxayna ku jilaysaa usha inay 'sixir ku samaynayso' saaxiibadeeda.

Maxay dabeecadani ka oranaysa horumarka ilmaha?

Sidee ayuu falcelintaada ilmaha u taageertaa xirfadaha fikirka garaadka?

**Shaqada Goobta: Awoodda Waxbarashada Ciyaarta ku Jirta**

Da'da Ilmaha:
Taariikhda iyo Wakhtiga:
Goobta Bii'ada:

Qeexitaanka Cayaarta:

Yaa go'aaminaya waxa lagu cayaarayo? Ma tahay mid ilmuhu hogaaminayo ama waa mid macalinku hagayo?

Waa maxay xirfadaha uu ilmuhu ku xoogan yahay? (Bulshada, Garaadka, Jirka, Luuqadda iyo Hadalka)

## Guudmarka Qaybta 4aad

**Knowledge and Competency Framework (KCF, Qaab-dhismeedka Aqoonta iyo Kartida) ee Minnesota ee Aagga Mowduuca Xirfadlayaasha Dhallaanka, Aagga Maadada Child Development Associate (CDA, Isku Xirka Horumarinta Carruurta)**

- Qaybta Nuxurka KCF: I. Korriinka iyo Waxbarashada Caruurta
- Aagga Maadada CDA: VIII. Mabaadii'da korriinka iyo waxbarashada carruurta

**Qeexitaanka Koorsada:**
Barashada da'da iyo marxaladaha korriinka caruurta iyo qodobada saamaynta ku leh korriinka caruurta inta lagu jro tababarkaan aasaasiga ah. Dib u eegista guulaha korriinka ee ku hagaya caruurta wadada horumarka shanta sanno ee ugu horeysa noloshooda. Baarista howlaha korriinka ku haboon iyo qiimaha cayaartu u leedahay nolosha caruurta yaryar, iyo sidoo kale muhiimadda xiriirku u leeyahay taageerista korriinka caruurta ee mustaqbalka, waxbarashada, iyo guusha.

**Ujeedooyinka Waxbarashada:**
Inta tababarkaanu socdo, ka qaybqaateyaashu waxay:

- Taageerada korriinka caruurta ayadoo la siinayo waaya-aragnimada waxbarashada micnaha leh ee bii'ada korriinka ku haboon.
- Sharax xeeladaha lagu hawlgelinayo qoysaska sidii taageerayaal dhanka waxbarashada carruurtooda.

## Guudmarka Qaybta 4aad

| | Wakhtiga Qaybta | Fikradaha Muhiimka Ah | Xeeladaha Waxbaridda |
|---|---|---|---|
| **A** | 15 qodobada kulanka | Soo dhawayn/Dib-u-eegista Ujeedooyinka<br>Dib u eegista kormeerka | Lammaanin iyo Wax wadaagis |
| **B** | 30 daqiiqo | Marka aan cayaaro, waxaan... | Hal Abuurka Kooxda Balaaran<br>Dooda Kooxda Balaaran<br>Hawsha Koox Yar<br>Dooda Kooxda Balaaran |
| **C** | 20 daqiiqo | Lixda Marxaladood ee Ciyaarta | Dooda Kooxda Yar<br>Milicsiga shakhsi ahaaneed |
| **D** | 30 daqiiqo | Xarumaha iyo Manhajyada DAP | |
| **E** | 15 daqiiqo | Ka Qaybgelinta Qoysaska ee Waxbarashada Carruurta | Dooda Kooxda Balaaran |
| **F** | 10 daqiiqo | Dib-u-eegista Ujeedooyinka/Soo Xirista | Kalmadda Xiritaanka Kulanka |
| | Wadarta Guud ee Wakhtiga: 2 saacadood | | |

**Developmentally Appropriate Practice (Habraaca Korriinka Wanaagsan, DAP) waxaa loo jeedaa** qaababka kor u qaadaya korriinka ilmaha iyo barashada ayadoo la adeegsanayo qaabka awooda ku slaaysan, cayaar ku salaysan ee farxadada, ka qaybqaadashada waxbarashada.

## Ilaha Kulanka

- Early Childhood Indicators of Progress (ECIPS, Tilmaamayaasha Horumarka Carruurnimada Hore): Tilmaamayaasha Horumarka Dhallaanka: Minnesota's Early Learning Standards

**Ereyada lasoo gaabiyay**

- National Association for the Education of Young Children (NAEYC, Ururka Qaranka ee Waxbarashada Carruurta Yaryar) National Association for the Education of Young Children (NAEYC, Ururka Qaranka ee Waxbarashada Carruurta Yaryar)
- DAP: Developmentally Appropriate Behavior Guidance (DAP, Hagaha Korriinka Habdhaqanka ee Haboon)
- Early Childhood Indicators of Progress (ECIPS, Tilmaamayaasha Horumarka Carruurnimada Hore): Early Childhood Indicators of Progress (Tilmaamayaasha Horumarka Dhallaanka)

## Marka aan cayaaro, waxaan...

Howl kasta oo cayaar ah, qor saddex xirfadood oo caruurtu wax uga bartaan cayaartooda.

| | |
|---|---|
| **Markii aan ku cayaaro alaabta, waxaan bartaa:** | • Xisaabta iyo xirfadaha joomitariga: Cabirada, qaababka, iyo naqshadaha<br>• Wacyiga goobta: Ku dul istaagista iyo iskudheelitirnaanta, qaabka walxuhu iskugu xiranyihiin goobta, aasaaska fiisigista<br>• Naqshadaynta injineeriyada: qorshaynta, abuurista, iyo xalinta |

| | |
|---|---|
| | khilaafaadka<br>• Xirfadaha bulshada iyo shucuurta: tooko qaadashada, la wadaagista, iyo wadashaqaynta |
| **Markii aan ku cayaaro ciida iyo miiska biyaha, waxaan bartaa:** | |
| **Markii aan matalaada cayaarayo, waxaan bartaa:** | |
| **Markii aan ku cayaaro xujiooyinka, waxaan bartaa:** | |
| **Marka aan cayaaro jaraanjarada, miisaanada, iyo meelaha lagu sinbiriiraxdo, waxaan bartaa:** | |
| **Markii aan ku cayaaro qooshaka, waxaan bartaa:** | |
| **Marka aan cayaaro sumadda, waxaan bartaa:** | |

**Goobta oo noqota Macalinka Saddexaad.** Marka laga tago qoyska iyo macalimiinta waxbarashada xiliga hore ee ilmaha, bii'ada tayada sare leh ayaa si taxadar leh loogu diyaariyaa si ay ugu dhiirigaliso ka fiirsiga, hal abuurka, iyo wadashaqaynta, lala yeelanayo baahiyaha ilmaha, danihiisa, iyo dhaqanka jira.

**Ka jawaabista Bii'ada:**

Sawir bii'ada xiligaagii caruurnimada. Inta aad dhex marayso barnaamijkaaga, isweydii su'aalahaan ku saabsan agabyada iyo howlaha. Samayso qoraalada isbadalada aad doonayso inaad meelmariso.

- Maxay caruurtu ka baran karaan waxyaabahaan iyo howlahaan?
- Maxay tahay sababta aan u siinayno qalabkaan iyo baambalahaan? Caruurtu ma danaynayaa? Ma muujinayaan qaab kusoo dhaweynaya cayaarta iyo waxbarashada?
- Maxaan ku dari karaa si aan gacan uga gaysto danaha canugga ee hadda iyo korriinkooda?
- Waa maxay nooca jadwalka kooxdaan caruurta ah u baahantahay? Ma u bahaanyihiin wakhti dheeraad ah oo ay ku cayaaraan?
- Waa maxay nooca bii'adu? Ma tahay wax lagu farxo oo wakhti badan qaadanaysa cayaarta iyo waxbarashada xorta ah, mise waxay u muuqanaysaa mid xadidan?
- Ma tahay bii'o si wanaagsan u diyaarsan, mise waa mid is dhex daadsan?
- Midabada iyo codadku ma yihiin kuwo nabadgalyo iyo koolkoolin leh, mise waa kuwo qaylo badan oo dareenka kicinaya?
- Haddii ada ahaan lahayd ilmo fasalka dhigta maalin walba, sidee dareemi lahayd wakhtiga aad halkaan ku sugantahay? Ma ku farxi lahayd mise ku niyadsamaan lahayd inaad halkaan wakhti ku qaadato?

**Qor sadeex isbadal oo aad meelmarinayso:**

**1.**

**2.**

**3.**

## Websaydka Manhajka Horumareed

**Fanka Hal abuurka leh**

**Xirfadaha Dhaqdhaqaaqa Weyn iyo Yaryar**

**Luqadda, Aqoonta Akhriska iyo Qoraalka, iyo Hadalka**

**Xiisaha caruurta, yoolalka horumarineed**

**Barashada Garaadka ah: Xisaabta**

**Barashada Garaadka ah: Sayniska**

**Xirfadaha Bulsheed iyo Shucuureed**

Saddex shay oo aan bartay ama aan xasuusto...

Laba waxyaalood oo aan rabo inaan wax kasii ogaado...

Hal shay oo aan berri meelmarin doono...